

Korona: Sidee si saxan ugu isticmaali kartaa af-xirashada?

Ma ahan inaan ag istaagno ama aad ugu dhawaano dadka kale. Ugu yaraan waa inaan hal mitir isku jirsano laakiin waxaa mararka qaarkood dhici karto inaan ku qasbanaano inaan dad kale ag-istaagno. Markaas waxaa muhiim ah inaan isticmaalno marada af-xirashada.



Bilde tatt fra avisen "LA VOZ DE GALICIA".

Kala dheeraashaha ayaa muhiim u ah si looga hortago fidista caabuqa. Line Vold oo katirsan heyadda caafimaadka bulshada(FHI) waxay dhahday af-xirashada waxaan u isticmaaleynaa inaan yareeno fidista caabuqan.

Heyadda caafimaadka bulshada(FHI) waxay si dhow ula socotaa cilmibaarisaha ku saabsan caabuqa Corona. Haddii aan isku jirsano hal mitir iyo wixii ka badan waxaa qatarta qaadista cudurkani yaraanaysaa sideetan boqolkiiba(80%). Halka af-xirashaduna yareeneyso fidista cudurka afartan boqolkiiba(40%).

Taasi micnaheedu waa iney wanaagsantahay kala dheeraashaha markii loo barbardhigo isticmaalka af-xirashada. Haddii aan sidaas sameyno waxaa hoos u dhacayo fidistii cudurka. Tanina waxay tusineysaa iney aad muhiim u tahay kala fogaanshaha dadka iyada oo la isku jirsanayo hal mitir iyo wixii ka badan.

Mararka qaarkood waan ku qasbanahay inaan xirano af-xirka sida markii aan baska ama tariinka raaceyano.

Heyadda caafimaadka bulshada (FHI) waxay ku tallin iney dadku isticmaalaan af-xirka markii aan gaadiidka dadweynaha raaceyano sida baska iyo tareenka.

Waa muhiim in sidaas la sameeyo haddii cudurku uu kordho bulshada dhexdeeda sidoo kalena ay adagtahay in ugu yaraan hal mitir la isku jirsado.

Dowladdu waxay sidoo kale dadka kula talineysaa iney isticmaalaan af-xirka markii laga soo bilaabo maalinta isniinta oo ee taariikhdu ku beegantahay 17.agoosto ilaayo iyo 14ka maalmood ay xiga. Arintani waxay si gaar ah u qoseysaa dadka ku dhex safrayo Oslo iyo deegaanada u dhow ee gobolka Østfold (Indre Østfold, Rakkestad, Skiptvedt og Marker).

Dadka qaarkood ma awoodaan iney isticmaalaan af-xirashada waxaa laga yaabaa iney qabaan cuduro kale oo aysan sidaas awgeed u isticmaali karin af-xirka. Haddii xaalkaadu sidaas yahay waxaa muhiim ah inaad dadka kale ugu yaraan hal mitir u jirsato haddii aysan macquul kuu aheyna waa inaad adiguna isticmaashaa af-xirka. Imaha da'doodu ka yartahay 13 sanno lagulama talinayo iney isticmaalaan af-xirka halka kuwa da'doodu ka yartahay labba sanno ee mamnuuc tahay in loo xiro af-xirka.

Heyadda caafimaadka bulshada(FHI) waxay bulshada reer Norway kula tallin in lasoo iibsado af-xir badan. Waxaa sidoo kale muhiim af-xirka in lagu tuuro maal habboon markii la isticmaalo dabadeed.

Af-xirku wuxuu muhiim u yahay oo kaliya markii caabuqa covid 19 bulshada uu aad ugu dhex faafo, markii cudurka la xadido uma baahnid inaad isticmaashid af-xirka.

Caawi dadka kale

Dadka oo dhan ma awoodaan ama maba rabbaan iney isticmaalaan af-xirka. Waxaa laga yaabaa dadka qaarkood iney qabaan cudurada ku dhaco sambabada ama ay la shaqeeyaan dadka maqaalkoodu liito (dhagoolaha ah), ama ay qabaan cudurada dhimirka ama ayba yihiin carruur da'doodu ay yartahay. Sidaas daraadeed waa muhiim inaan fahano dadka oo dhan iney san wada isticmaali karin af-xirka dadka oo dhanna ee mudanyihiin in la wada xushmeeyo.

Vold iyada oo arinkaas ka hadleyso waxay dhahday «waa muhiim inaan isku dulqaadano isna aqbalno, qof walbo si ayuu wax u arkaa»



Kilde:
<https://www.fhi.no/nyheter/2020/anbefalinger-knyttet-til-munnbind/>



INTEGRERING- OG
MANGFOLDSDIREKTORATET



NORSK FOLKEHJELP
OSLO

Oversatt til somali av Ismaili Ali Hussein

Grafisk designer: Aniabell Valdes Ochoa

Av Norsk Folkehjelp Oslo, OASEN Kvinner Krysser Grenser

